



Cabot's core values are:

**Partnership Inclusion Excellence**

**Cabot Primary School**

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 20<sup>ka</sup> Juun 2023

Gacaliyaaal Qoysas,

Kan waa warside khaas ah oo ku saabsan sida aan ugu diyaar garoobeyno sannad-dugsiyadeedka soo socda oo billaabano doono bisha Sibtember. Waxaan ognahay in ay muhiim u tahay qof walba in ay dareemaan in ay og yihiin waxa dhici doona waqtina u helaan ay ku raadiyaan akhbaarta habboon weydiyaanna su'aalaha ay u baahan yihiin.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H



### Fasallada bisha Sibtember

Maadaama ay Mrs Carter iyo Miss Thompson ay shaqo ka heleen dugsiyo guryahooda u dhaw, waxaan hadda ku gudi jirnaa shaqaaleynta macallimiin Fasalka 1 iyo Fasalka 2. Waan kula socodsiiin doonnaa akhbaarta dheeriga ah. Fadlan ogsoonow fasallada waxay ahaan doonaan kooxaha ay hadda yihiin.

- Risabshanka – Miss McDonald
- Fasalka Kambaska – Miss Flavia
- Fasalka 1 – Macallin Raadin
- Fasalka 2 – Macallin Raadin
- Fasalka 3 – Miss Drayton
- Fasalka 4 – Miss Tupman
- Fasalka 5 – Miss Codling
- Fasalka 6 – Mr Marles

Mr Town weli wuxuu dabooli doonaa fasallada qaar marka macallimiinta ay ku jiraan waqtigooda cashar diyaarinta.

Sida ay sannadkaan ahayd, Kaaliyayaasha Macallimiinta fasal u gooni ah ma jiro ee waxay ka shaqeeyaan meesha khibraddooda ay ku habboon tahay si ay u caawiyaan baahida carruurta.

### Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 26<sup>da</sup>/27<sup>ka</sup> Juun Maalinta Xayawaanka
- 27<sup>da</sup> Juun – Guddiga Akadeemiyada ayaa u qabanaaya subaxa qaxwaha waalidiinta
- 3<sup>da</sup> Juulaay - Usbuuca Guriga – waxaa ku jira maalmaha ciyaaraha
- 7<sup>da</sup> Juulaay - La-wadaagid Warbixinta
- 20<sup>ka</sup> Juulaay – Maalinta ugu dambaysa xilliga (Maalin INSET 21.07.21)
- 1<sup>da</sup> Sibtember – INSET
- 4<sup>ta</sup> Sibtember – INSET
- 5<sup>ta</sup> Sibtember – Maalinta ugu horreysa ardayda ee Xilliga

### Maalmaha Geeddiga ee Dugsiga

Si ardayda looga caawiyo la qabsiga fasal iyo macallin cusub, waxaan qorsheynay 3 geeddi-socod. (Fasallada aan weli ogeyn macallimiintooda waxaa dabooli doonta Miss Quinton, oo ah hoggaamiyaha KS iyo Mrs Carter/Miss Thompson kuwaasoo hadda ka shaqeeya EY/KS1.)

Maalinta ugu horreysa waa 30<sup>ka</sup> Juun galabtii– ardayda waxaa loo caawin doonaa saf saf qadada ka dib meesha kooxdooda cusub ay ku saftaan iyagoo meeshaas ka aadi doona fasalkooda cusub. Fadlan maalintaas ka soo kaxee fasalka cusub. (Waxaan jeeso ku qori doonnaa baannaanka fasal walba si lagaaga caawiyo inaad fasalka cusub heshid.)

Midka xiga waa 3<sup>da</sup> Juulaay subixii – fadlan canuggaada keen fasalkiisa cusub (mar kale, waxaan jeeso ku qori doonnaa baannaanka fasal walba si lagaaga caawiyo inaad fasalka cusub heshid) kaxeeynta waxay noqon doontaa fasalka uu hadda ku jiro.

Midka ugu dambeeya waa 13<sup>ka</sup> Juulaay – fadlan keen kana kaxee canuggaada fasalka cusub. Subaxaan, waxaa imaan doona ardayda Fasalka Risabshanka ee cusub si ay macallinkooda ula kulmaan ayna u ogaadaan fasalkooda cusub. Waxaa kaloo imaan doona qaar ka mid ah St Barnbas kuwaasoo dugsiigeenna ku soo biiri doona Sibtember si ay fasalkooda iyo macallinkooda cusub ula kulmaan. Maalintaan, Mr Elston, oo ah Kaaliya Macallin cusub ayaa xataa na soo booqan doona.

Fasalkeenna 6 ee hadda qeyb ayuu ka yahay geedii-socodka iyagoo la kulmaaya dugsiyadooda sare. Waxaan na soo gaaray warbixin wanaagsan ee hab-dhaqankooda iyo kalsoonidooda. Maalmaha geedi-socodka, Fasalka 6 waxay joogi doonaan qolka Art iyo DTee fadlan meesha keen kana kaxee.

Geeddi-socodka ka hor, macallimiinta waxay waqti u heli doonaan ama in ay qoraal u sameeyaan macallimiinta cusub ee dugsiigeenna ama ay la hadlaan macallimiinta hadda ee fasalka maxaa yeelay waxaan og nahay sida ay muhiim u tahay in qof walba uu ku baraarugsan yahay meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo meelaha in laga horumariyo canug walba ay tahay.

Haddii aad wax su'aah ah aad qabto, fadlan la hadal macallinka fasalka ee hadda. Sidii mar walbaba, aad ayaad ugu mahadsan tihiin taageeradiina.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630